

Barnaamijka Taageerada
Ilmaha Gobolka Washington



Guddiyada Shirka Taageerada Ilmaha



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

DSHS 22-386 SM (Rev. 9/16)

Maxaa laga wadaa Guddiga Shirka?

Guddiga Shirka waa qaab lagu xaliyo murunada ama khilaafyada ee kusaabsan sida Qaybta Taageerada Ilmaha (DCS) ay wax uga qabto kiiskaaga ama xaaladaada. Madaxa Guddiga Shirka waa qareenka Qaybta Taageerada Ilmaha midkaas oo qaata go'aanada.

Maxay yihiin noocyada gargaarka uu Guddiga Shirka awood u leeyahay in uu bixiyo?

Guddiyada Shirka waxay:

- Siidayn doontaa dammaanadaha laga fayl gareeyo dhinaca Qaybta Taageerada Ilmaha.
- Siideyn doontaa lacagta Qaybta Taageerada Ilmaha ka hesho dhinaca lacag celinada canshuurta IRS, koontooyinka bankiga, ama illo dhaqaale kale.
- Bedeli karaan lacagta xajinta laga xajiyo lacag bixintaada.
- Go'aansan karaan haddii Qaybta Taakulaynta Ilmaha ay u sheegi doonto daynta taageerada ilmaha xafiiska daynta iyo haddii kale oo aan u sheegi doonin.
- Go'aansan doonaan haddii Qaybta Taageerada Ilmaha ay fulin doonto amarka ama aruuriso daynta.
- Yarayn doonaan taageerada dib u celinta lagu leeyahay Gobolka Washington.
- Muraajacayn doonaan oona hagaajin doonaan tallaabooyin kale oo laga qaato dhinaca Qaybta Taageerada Ilmaha.

Guddiyada Shirka KALIYA waxay cafin karaan daymaha lagu leeyahay Gobolka Washington, ayada oo ay kusalaysantahay:

- Nolosha adag ee uu ku noolyahay waalidka lacagta bixinaya ama ka jirta guriga waalidka.
- Heshiiska qayb lacag bixinta ah.
- Qiimo mustaqbalka ah oo lacagaha la aruuriyo ah.
- Khalad ama mowduuc sharci oo yaraynaya suurtagalnimada lacag aruurinta.

Ma jiraan mushkilado uusan xalin karin Guddiga Shirka?

Haa. Guddiga Shirka ma ahan mid:

- Bedeli kara tirada lacagta taageerada ilmaha la amray ee amarka maxkamada ama maamulka.
- Yarayn kara daymaha lagu leeyahay qof kali ah, gobol kale, ama wakaalad kale.
- Go'aamiya booqashada ama mowduucyada xanaanada.

Waa in aad isku daydaa marka hore in aad ka xalisid kiiskaaga xafiiska qaybta.

Ma xalin karaa kiiskayga ayada oo aan jirin Guddiga Shirka?

Haa, shaqaalaha majaalka Qaybta Taageerada Ilmaha wuxuu qaadan karaa qaar kamid ah isla go'aanada ay qaataan Guddiyada Shirka. La xariir Shaqaalaha Fullinta Taageerada (SEO) loo qoondeeyay kiiskaaga si aad u gaarto heshiis kahor Guddiga Shirka. Sidoo kale waxaad la hadli kartaa madaxa shaqaalaha ama horjoogaha. Haddii aadan gaarin heshiis, weli waxaad haysataa Guddiga Shirka.

Sideen u codsan karaa Guddiga Shirka?

- Kala xiriir xafiiska majaalka Qaybta Taageerada Ilmaha teleefoon, boosto amaba si shakhsi ahaan ah. Xafiiska majaalka wuxuu u wareejin doonaa kiiskaaga Qaybta Guddiga Shirka.
- Sharaxaad ka bixi waxa aadan oggolayn iyo sababta aadan u oggolayn.
- Bixi macluumaad si aad ugu xoojisid waxa aad sheegaysid.

Sidee Madaxa Guddiga Shirka u gaari doonaa go'aanka?

Madaxdu waxay ku saleeyaan go'aanadooda:

- Diiwaanada Qaybta Taageerada Ilmaha, xeerarka iyo sharciyada, iyo
- Macluumaadka adiga ama qaybta kale bixiso.

Ma jiraa kullan?

Badanaa Madaxa Guddiga Shirka ayaa gaara go'aanka asaga oo aan adiga kula kulmin. Waxay adiga kugu weydiin karaan macluumaad baddan qaab warqad ama teleefoon. Midkay noqotaba, waxaad heli doontaa go'aan qoran.

Maxaa ka dhacaya meesha kullanka Guddiga Shirka?

Madaxa iyo hal ama ka baddan oo shaqaalaha Qaybta Taageerada Ilmaha ah ayaa uga qayb qaadanaya kullanka aan rasmiga ahayn tooska teleefoonka.

Xubnaha Guddiga ayaa dhagaysanaya kadibna weydiinaya su'aalaha marka aad sheegaysid aragtidaada kusaabsan muranka. Qaybaha kale ayaa sidoo kale wadaagi doona aragtidooda, xaaladaha qaarkooda.

Kullamada badanaa waxay sii soconayaa wax kayar hal saac.

Sideen uga qayb qaadanayaa kullanka Guddiga Shirka?

Adiga, Madaxa, shaqaalaha Qaybta Taageerada Ilmaha, ama dadka kale ee ku lug leh kullanka ayaa uga qayb qaadanaya qaab teleefoon.

Si aad ugaga qayb qaadatid qaab teleefoon, waxaa khasab kugu ah:

- In aad ka wacdid Qaybta Taageerada Ilmaha lambarka lagu qoray oggaysiiska kahor todobaad inta aan kullanka bilaabanin si aad u hubsatid in Qaybta Taageerada Ilmaha ay haysato lambarkaaga teleefoonka saxda ah, iyo
- In aad kujirtid lambarkaasi teleefoonka taariikhda iyo iyo wakhtiga uu dhacayo kullanka.

Haddii aan jirin teleefoon aad isticmaali karto, noola soo xiriir sida ugu dhakhsiyaha baddan kadibna samee qabanqaabyo kale.

Sideen u codsan karaa taariikh ama wakhti kale oo loogu talagalay Guddiga Shirka?

Haddii aadan kasoo bixi karin ballantaada jadwalka kullanka wac kadibna waydiiso in dib laguugu sameeyo jadwal. Wac Qaybta Taageerada Ilmaha ugu yaraan hal todobaad kahor maalinta kullanka. Oggaysiiska Guddiga Shirka wuxuu kusiinayaa lambarka teleefoonka aad soo wacayso.

Miyaan u baahanahay in aan wax u diro Guddiga Shirka?

Haddii aad haysatid warqado aad doonaysid in Madaxa shirka uu fiiriyo, u dir Qaybta Taageerada Ilmaha kahor kullankaaga, haddii ay suurto galtahay. Dhammaan qaybaha kale waxay arki karaan caddayntaada, sidaas darteeda waxaad u baahnaan kartaa in aad tirtid macluumaadkaaga shakhsiyeed. Madaxa wuxuu haysan doonaa dhammaan warqadaha aad siiso Qaybta Taageerada Ilmaha.

Sideen ugu diyaar garoowi karaa Guddiga Shirka?

- Samayso warqado yar-yar oo fikradahaaga ku qoratid si aad isugu habbeyso waxa aad sheegaysid.
- Bixi wax kasta oo warqado ah kuwaas oo ku caawinaya Madaxa in uu fahamo oona xaliyo muranka ama khilaafka.

Inta lagu guda jiro kullanka Guddiga Shirka, waxaad:

- Wakiil ka dhigan kartaa qofkasta, sida qof qareen, saaxiib ama qaraabo ah. Si kastaba, adigu xaq uma lihid caawimaad sharci bilaash ah oo ka ahaata dhinaca Qaybta Taageerada Ilmaha.
- Sheegi kartaa fikradaada kusaabsan kiiska.
- Muujin kartaa caddayn; sida jeegaga la buriyay, diiwaano iskuul, bayaan markhaati ama warqado kale.
- Weydiin kartaa in aad dirtid caddayn baddan kadib shirka.
- Ka dhigi kartaa in Madaxa uu waco markhaatigaaga.

Xubnaha Guddiga ayaa ku weydiin kara su'aalo adiga iyo markhaatigaaga.

Fadlan ixtiraam waxa ay dadka kale soo bandhigayaan.

Maxaa dhacaya haddii aanan joogin kullanka?

Haddii aan Madaxa shirka kugu helin teleefoonka si aad uga qayb gashid kullanka, Madaxa wuxuu:

- Burin karaa codsigaaga.
- Sii wadayaa kullanka adiga la'aantaada.

Sideen ku oggaan karaa goorta kullankayga la go'aamiyay?

Qaybta Taageerada Ilmaha ayaa kuu soo diraysa fariin boosto Oggaysiis ah oo ay ku qorantahay taariikhda iyo wakhtiga kullanka. Iska hubso in Qaybta Taageerada Ilmaha ay garanayso ama ogtahay cinwaanka boostadaada hadda ah iyo lambarka teleefoonka.

Maxaan sameeyaa haddii aanan jeclayn go'aanka Guddiga Shirka?

Weydiiso muraajaco ama dib u eegid aan rasmi ahayn adiga oo waraaq ugu soo diraa Maamulaha Guddiga Shirka cinwaankan:

PO Box 9162, Olympia, WA 98507

Maxaan sameeyaa haddii aanan ugu hadlin luuqada Ingiriisiga si fiican ama qabbo baahooyin khaas ah?

Wac 360-664-5326 ama 800-457-6202 haddii adiga ama markhaatiga u baahanyahay:

- Turjumaan luuqad ama turjumaan hadal. Saaxiib ama qof qaraabo ah ma noqon karo adiga turjumaankaaga aan ka ahayn haddii hore loo oggolaaday.
- Caawimaado kale oo khaas ah sida turjumaan luuqada indhoolaha ama dhagoolaha ah ama waxyaabo kale oo bedel u ah naafo darteeda.

Wac 360-664-5011 haddii aad u baahantahay caawimaada Dhagoolaha iyo Maqalka Adag ee Qaybta Taageerada Ilmaha (TDD).

Weydiiso adeegahan bilaashka ah ugu yaraan todobaad kahor kullanka.

Dhammaan xafiisyada Qaybta Taageerada Ilmaha waa kuwo lagu gali karo kursiga curyaanimada ama qofka curyaanka ah ku fadhiisto.

Haddii aad qabtid su'aalo kale oo kusaabsan Guddiga Shirka, waxaad:

- Ka wici kartaa xafiiska Majaalka Qaybta Taageerada Ilmaha ama Qaybta Guddiga Shirka lambarada ku qoran gadaasha qoraalkan.
- La xiriiri kartaa qareen.

Wac xafiiska Qaybta Taageerada Ilmaha kuugu dhow ama wac 800-442-KIDS (5437) si aad u oggaatid xafiiska gacanta ku haya kiiskaaga.

Xafiisyada Qaybta Taakulaynta Ilmaha:

Everett	800-729-7580 425-438-4800
Kennewick	800-345-9981 509-374-2000
Olympia	800-345-9964 360-664-6900
Seattle	800-526-8658 206-341-7000
Spokane	800-345-9982 509-363-5000
Tacoma	800-345-9976 253-597-3700
Vancouver	800-345-9984 360-696-6100
Wenatchee	800-535-1113 509-886-6800
Yakima	800-441-0859 509-249-6000
Saldhigyada	800-457-6202 360-664-5000

Qaybta Guddiga Shirka

800-457-6202
360-664-5326

Faakis 360-664-5340

Xeerarka xukumaya Guddiyada Shirka waxay ku qoranyihiin Qaanuunka Maamulka Washington: WAC 388-14A-6400 tooska 6415



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

KA JEEX HALKAN, ISKU LAAB KADIBNA KU XIR SHAROOTADA.

Codso Guddiga Shirka

Si aad u codsatid Guddiga Shirka, buuxi foomkan kadibna ku celi Qaybta Taageerada Ilmaha (DCS). Aan ka ahayn sixixaaga, qor dhammaan jawaabaha. Soo lifaaq boggag dheeri ah haddii loo baahdo.

Waxaan isku dayay in aan ku xaliyo khilaafkayga shaqaalaha Qaybta Taageerada Ilmaha. Waxaan codsanayaa Guddiga Shirka sababtoo ah:

Anigu waan fahansanahay in:

- Guddiga Shirka uu isku dayayo in uu u xaliyo cabashooyinka qaab aan rasmi ahayn. Guddiga aan dib u habbeyn kasamayn karin marka maxkamada. Maxkamadu kuma samaynayso murajaco xeerarka Guddiga.
- Midaan aan ahayn codsi loogu talagalay hawl garsoormimo (dhagaysi). Guddiga Shirka uusan qaadanaynin booska xaq kale ee aan u leeyahay dhagaysiga. Codsigaan uusan ka joojinaynin Qaybta Taageerada Ilmaha in ay qaadatao tallaabooyin wax aruurin.
- Aan matali karo nafsadayda ama uu qofkale i matalo. Qaybta Taageerada Ilmaha aanan bixin doonin qiimooyinkayga.
- Qaybta Taageerada Ilmaha ay u diri karto nuqul ku saabsan codsigan qaybta kale si loogu diro kiiska taageerada ilmaha. Qaybta Taageerada Ilmaha ay ka saari doonto cinwaankayga nuqulka loo dirayo dhinaca ama qaybta kale.

Ofna sababo la xirira qoladiisa, midabkiisa, wadanka uu ka soo jeedo, caqiidadiisa, diintisa, Lab ahaan ama dheddig ahaanta, da'diisa, ama curyaanimaddiisa, looguma takoori karo shaqo-qoris, adeegyo, ama aragti kasta ee waxqabadayda barnaamijka kamid ah. Foomkaan waxaa loo helli karaa qaabab baddel ah haddii la codsado.

Qor Magaca

PO Box ama Cinwaanka Waddada

Magaalada

Gobolka

Furaha xaafada

Taariikhda

Teleefoonka Guriga

Teleefoonka Shaqada

Sixixa



Lambarka Kiiska. (haddii la garanayo):

NAME

ADDRESS

CITY/STATE/ZIP

PLACE
STAMP
HERE



DEPARTMENT OF SOCIAL & HEALTH SVCS
DIVISION OF CHILD SUPPORT
PO BOX 11520
TACOMA WA 98411-5520